

Waxay ku socotaa qofka guriga degan,

### WARBIXIN MUHIIM AH OO KU SAABSAN OGEYSIISKII MAANTA

Waxaan qoraalkaan kuugu soo direynaa inaan kula socodsiino horumarka Mashruuca Dhismaha Weyn ee Homes Victoria (Homes Victoria's Big Housing Build) iyo wixii lagu dhawaaqay maanta, 20-ka Sebtembar 2024, ee ku saabsan dib-u-kobcinta guryaha bulshada ee agagaarkaaga.

Iyada oo qayb ka ah Dhismaha Guriyeynta Waa Weyn, Dawladda Victoria waxay qaadaysaa tillaabada weyn ee xigta ee dib-u-horumarinta guryihii duqoobay ee bulshada ee ku yaal Melbourne oo dhan.

#### Maxaa maanta lagu dhawaaqay?

Maanta, waxaan ku wargelinay dadka degan dhismayaasha soo socda in wada hadalka bilowga u ah qorsheynta guuritaankoodu uu bilaaban doono dhawaan howshuna dhamaan doonto Febraayo 2026:

- 259 Malvern Road, South Yarra
- 139 Highett Street, Richmond
- 111, 119 & 127 Elizabeth Street, Richmond
- 6 & 8 Anderson Court, Richmond
- 1-5, 7 & 9 Williams Court, Richmond.

#### Taariikhda dhamaadka raritaanka ee Flemington iyo North Melbourne ayaa lagu dhawaaqay

Waxaan sidoo kale ku wargalinay dadka degan dhismayaasha soo socda ee bilaabay guurista dabayaaqada sanadkii 2023 in dib-u-guuritaankoodu ay dhamaan doonto Sebtembar 2025:

- 120 Racecourse Road, Flemington
- 12 Holland Court, Flemington
- 33 Alfred Street, North Melbourne.



## **Ma jiraan dib-u-guuritaan kale oo ah saraha dhaadheer oo bilaabmaya ka hor Luulyo 2026**

Ma fileyno in dadka degan dabaqyada dhaadheer ay u baahan doonaan inay bilaabaan dib-uguuritaan ilaa Luulyo 2026. Dib ayaan idin kala soo xiriiri doonaa markaan wax badan ka ogaano waqtiga dib-u-guurista ee guriga hadda degan tahay.

### **Waxa ay tani adiga kaaga dhigan tahay**

Inkasta oo gurigaagu aanu ka mid ahayn dib u dhiska saraha dhaadheer, waxa laga yaabaa inaad dareento isbedelada ka dhacaya xaafadaha kale marka uu barnaamijku socdo.

### **Ku saabsan barnaamijka dib u dhiska**

Mashruuca Dhismaha Weyn waxa uu qaadi doonaa tillaabada weyn ee xigta ee meesha looga saarayo si markaas dib loogu dayactiro 44 dabaqyada dhaadheer ee guryaha dowlad ah oo ku kala yaal Melbourne si loo dhiso guryo ka badan kana wanaagsan kuwii hore.

Sarahaan dhaadheer ee duqoobay waxa lagu bedeli doonaa guryo cusub oo buuxiya heerarka casriga ah marka laga hadlayo raaxada, sida sahlan ee lagu geli karo, iyo hufnaanta tamarta. Dib u dhiskani waa lama horaan sababtoo ah way adagtahay in nashqada gaarka ah ee saraha dhaadheer ee duqoobay ay sii ahaadaan kuwo u qalma heerarka dadka degan hadda, iyo in mustaqbalka guryo ay helaan dad badan oo reer Victoria ah. Marka dayactir ku sameyno dhismayaashan, waxaan hxaqiijinaynaa in dadka deegaanka ay ku noolaan karaan guryo ammaan ah, raaxo leh, oo ku habboon baahidooda hadda jirta iyo tan mustaqbalka.

### **Sida aad wixii soo cusboonaado ula socon karto**

Inkastoo ku dhawaaqistani aanay si toos ah kuu saamaynayn, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad ku xidhnaato barnaamijka dibu dhiska haddii aad doonayso inaad wax badan ka barato.

Waxaad booqan kartaa boggayaga internetka oo ah [bighousingbuild.homes.vic.gov.au](http://bighousingbuild.homes.vic.gov.au), halkaas oo aad ka heli doonto macluumaad dheeraad ah. Sidoo kalena waad is-diiwaangelin kartaa si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aad rabto macluumaad dheeraad ah, waxaad nagula soo xiriiri kartaa khadka, telefoonka, ama waxaad booqan kartaa xafiiska guryeynta ee degaankaaga. Waxaa naga go'an in aan wargelino dhammaan dadka deggan guryaha dadweynaha oo aan taageerro inta aan ka wada shaqeeyno dhisida guryo ka wanaagsan kuwii hore.

Salaan diiran



**Dannii de Kretser**

*Maamulaha ku meel gaadhka ah,  
Homes Victoria*

[www.homes.vic.gov.au](http://www.homes.vic.gov.au)



Nagala soco baraha bulshada.  
Raadi Homes Victoria

